

Kalsoonida Waxbarida jaamacadeed iyo cilmi baarista
shaqueynaysa

Bridge Park Plaza
Bridge Park Road
Thurmaston
Leicester
LE4 8PQ

www.leicspart.nhs.uk

Diseembar 2021

Qofka Dhallinyarada ah iyo Waalidka / Daryelaha Qaaliga ah,

Barnaamijka tallaalidda COVID-19 – garoojada koowaad iyo tan labaad ee dugsiyada dhexdooda

Dhammaan carruurta da'doodu ay u dhaxayso 12 ilaa 15 sano jir waxay u qalmaan inay qaataan laba garoojo oo ah tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19, Comirnaty. Tallaalka waxaa uu ka caawin doonaa inuu ka difaaco fayraska oo uu yareeyo ku faafitaankiisa bulshada dhexdeeda iyo aaga dugsiga.

Carruurta caafimaadka qabta kuwaas oobaaritaankoodu ku aadan COVID-19 uu noqday mid togan waxay u baahan yihii inay sugaan 12 toddobaad ka hor inta aysan qaadanin tallaalka. Garoojooyinka labaad waa inay sidoo kale ahaadaan 12 toddobaad laga bilaabo garoojada koowaad ee qofka da' yarta ah.

Si ilmahaaga tallaalkooda ay ugu helaan dugsiga dhexdiisa:

1. Booqo: www.leicsandrutlandimms.co.uk
2. Dooro COVID-19 adiga oo gujinaaya badhanka iyada ku xiga ee "Guji halkan".
3. Geli Koodhka uu leeyahay dugsigaaga.
Loogu talagalay **Winstanley School** waxaa waaye **LE143844**
4. Geli faahfaahinada canugaaga
5. Taabo 'GUDBI'

*Ama waxaad
sawiri kartaa
koodhka QR-
kaan*



Talooyin waaweyn:

- Xaqiji in cinwaanada iimaylka ee aad gelineyso ay si buuxda isugu mid yihii.
- Ha taabanin ka laabo ama ha ugu tagin wax meel bannaan ka dib marka aad geliso cinwaanada iimaylkaaga.
- Ha taabanin ka laabo ama ha ugu tagin wax meel bannaan ka dib marka aad geliso koodhka dugsigaaga.

Fadlan xasuusnow:

Trust Headquarters(Xarumaha dhexe Kalsooni): Bridge Park Plaza, Bridge Park Road, Thurmaston, Leicester. LE4 8PQ

Gudoomiye: Cathy Ellis Madaxa fulinta: Angela Hillary

Waxaan nahay Kalsooni sigaar cabida xor ka ah(smoke-free Trust).

Ka arag ogeysiiska qarsoonideena www.leicspart.nhs.uk/_Aboutus-Whatwedowithyourinformationprivacynotice.aspx

- Wuxaad u baahan doontaa inaad si buuxda u dhamaystirto foomka oggolaanshaha ka hor inta aadan tagin kulanka tallaalidda.
- Waxaa ku soo wargelin doona dugsigaaga taariikhda tallaalka.
- Awood uma yeelan doontid inaad ku dhammaystirto oggolaanshahaan onlaynka ah 1 maalin oo la shaqeyo gudaheeda oo ka mid ah kulanka tallaalidda.
- Haddii aad u baahan tahay caawinaad ku aadan buuxinta foomka onlaynka ah ama aad jeceshahay inaad qof kala hadasho wax ku saabsan isbadellada ku imaaday xaalada caafimaadka canugaaga, fadlan taleefoon u dir: 0300 300 0007.

Si ilmahaaga tallaalkooda ay ugu helaan dugsiga bannaankiisa:

Haddii aad dooneyo inaad la joogto ilmahaaga marka ay qaadanaayaan tallaalkooda, waxaad la aadi kartaa mid kasta oo ka mid ah rugaha tallaalka iska-socotada ee ka furan agagaarka Leicester, Leicestershire & Rutland.

Si aad u hesho wixii macluumaaad dheeraad ah ee ku saabsan rugaha caafimaadka iyo si aad u hesho xarunta kuugu dhow iska-socotada fadlan booqo:

www.leicestercityccg.nhs.uk/my-health/coronavirus-advice/coronavirus-vaccine

Tallaallada dugsiga dhediisa

Canugaaga waxaa lagu casumi doonaa kulanka tallalka ee dugsiga dhediisa. Tallaalkan waa lacag la'aan waxaana lagu bixiyaa oo kaliya ogolaanshahaaga.

Tallaalka COVID-19 waxa lagu duraa garabka sare. Tallaalada waxa ay bixiyaan difaac iyo caawimaad si loo joojiyo faafitaanka fayraska. Waxa laga yaabaa inay ku qaadato dhawr toddobaad in jirka canugaaga u soo dhisto difaaca ka hortagga ee ka dhanka ah fayraska.

Si aad u akhriso buug-yaraha macluumaaadka bukaanka ee ku saabsan tallaalka fadlan booqo: <http://tiny.cc/covid19forCYP>

Haddii canugaaga uu ka maqan yahay maalinta tallaalka, taariikh labaad ayaa la siin doonaa, ama waxaad canugaaga geyn kartaa rugta tallaalka iska-socotada ee deegaanka, dugsiga ka baxsan.

Haddii qof aad la nooshahay uu leeyahay calaamadaha COVID-19 ama aad la nooshahay qof kaas oo isgo'doomin ku jira, ilmahaaga waa in aysan soo xaadirin ballanta tallaalkooda ee dugsiga dhediisa, waxaana la siin doonaa taariikh cusub oo tallaal ah.

Calaamaduhu waa:

- Heerkulka sare – kulayl laga dareemo taabashada dusha sare ee laabta ama dhabarka
- Qufac cusub – tan waxay la macno tahay inaad si isdaba joog ah u bilowday inaad qufacdo.
- Waayida ama isbadel ku yimaada dareenka urta ama dhadhanka

Wixii macluumaaad dheeraad ah iyo si aad u daawato muuqaalkeena kaas oo sharaxaaya wax badan oo ku saabsan tallaalka fadlan booqo:


www.healthforteens.co.uk/health/coronavirus/covid-19-vaccination-information

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kale ama aad u baahan tahay taageero si aad u bixiso ogolaanshaha, fadlan taleefoon u soo dir: 0300 300 0007, ama iimayl ahaan:
communityimmunisations.service@nhs.net

Daacadnimadaada,



Dr Tim Davies
Hogaanka La talinta ee loogu talagalay
Baaritaanka iyo Tallaalka
NHS England and NHS Improvement – Midlands



Suzanne L. Leatherland.

Suzanne Leatherland
Hogaanka Caafimaadka ee loogu
talagalay Barnaamijka COVID-19 ee
Carruurta
Leicestershire Partnership NHS Trust

Haddii aad jeelaan lahayd inaad warqaddaan ku aqrисато luuqad kale gal barteenна
www.leicspart.nhs.uk/communityimms

Carabi إذا كنت ترغب في قراءة هذه الرسالة بلغة أخرى، قم بزيارة موقعنا على الإنترنت

Gujarati જો તમે આ પત્ર ગુજરાતીમાં વાંચવા માંગતા હો તો અમારી વેબસાઇટ પર જાઓ

Polish Jeśli chcesz przeczytać ten list w innym języku, przejdź na naszą stronę.

Punjabi ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਇਸ ਪੱਤਰ ਨੂੰ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਪੜ੍ਹਨਾ ਚਾਹੁੰਦੇ ਹੋ ਤਾਂ ਸਾਡੀ ਵੈੱਬਸਾਈਟ 'ਤੇ ਜਾਓ

Soomaali Haddii aad jeelaan lahayd inaad ku akhrido warqadan luuqad kale, booqo boggayaga internetka

Urdu اگر آپ اردو میں یہ خط پڑھنا چاہتے ہیں تو بماری ویب سائٹ پر جائیں۔

Wixii ku aadan luuqadaha kale: www.nhs.uk/accessibility/health-information-in-other-languages

ОГЕysiisyada Ku Saabsan Buuxinta Foomka Ogolaanshaha Onlaynka Ah

Booqo: www.leicsandrutlandimms.co.uk

Door COVID-19 adiga oo gujinaaya badhanka iyada ku xiga ee “Guji halkan”.

Geli oo xaqiji ciwaanka iimaylkaaga

Geli koodhka dugsigaaga: LE143844 oo guji “Raadi dugs”. Magaca dugsigaaga ayaa soo muuqanaaya.

Nidaamkan onlaynka ah waxaa uu xirmaayaa I maalin oo la shaqeyo ka hor taariikhda tallaalka. Farriin ayaa kuu soo muuqan doonta oo ku weydiinaysa inaad mar labaad isku daydo kulanka ka dib & waxayna ku siineysaa taariikh kale oo tallaal ah.

Talo weyn:

- Si aad u hesho boggeena guriga waxaad sidoo kale onlaynka ku raadin kartaa “Leicester imms”
- Xaqiji in ciwaanada iimaylka ay iswaafaqsan yihii.
- Ha soo gelinin nafaasyo ama xarako ka hor ama ka dib ciwaanka iimaylka iyo koodka dugsiga.

QEYBTA 1aad: Macluumaadka Bukaanka iyo Faahfaahinada Xiriirka

QEYBTA 2aad: Taariikhda Hore Caafimaadka

Dhameystir su'aalaha ku saabsan taariikhda hore ee caafimaadka iyo tallaalka.

QEYBTA 3aad: Bayaanka Oggolaanshaha

Dhameystir tan si aad oggolaanshaha ugu siiso koorsada buuxda ee tallaalka COVID-19.

Fadlan xasuusnow: Qofka da'da yar ee qaangaarka ah ayaa laga yaabaa inuu awood u leeyahay inuu oggolaansho iska bixiyo naftiisa si uu u qaato tallaalkan adiga oo an ku raacsaneyn iyo xirfadlayaasha caafimaadku waxay qiimeyn doonaan awoodda ay u leeyihiin inay qaataan go'aan xog ogaal ah.

Wadaagida macluumaadka: Tallaalka dugsiga ka dib, ogeysiis ayaa la bixin doonaa waxaana macluumaadka lagu dari doonaa diiwaanada caafimaadka NHS ee qofka da' yarka ah.